**MACLUUMAADKA SCREENING – Baaritaannada xadka dibadda**
**Ka gudbid aan la oggolayn oo badda ah ama dhacdooyinka SAR – Lampedusa iyo Pantelleria**

Waxaad joogtaa Lampedusa, gudaha Talyaaniga oo ka tirsan Midowga Yurub. Waxaan kuu xaqiijinaynaa inaan halkan u joogno inaan ku taageerno; haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad, ha ka labalabeyn inaad weydiiso.
Waxaad xaq u leedahay inaad isticmaasho adeegyada turjumaadda iyo dhexdhexaadinta dhaqanka ee la heli karo si loo xaqiijiyo isgaarsiin sax ah oo lala yeesho Hay'adaha awoodda leh. Intaa waxaa dheer, waqti kasta waxaad weydiin kartaa su'aalo oo waxaad codsan kartaa faahfaahin dheeraad ah. Haddii ay suurtagal tahay, waxaad codsan kartaa inaad la hadasho nin ama haweeney.

1. **<u>Shuruudaha gelitaanka</u>**

Waqtigan xaadirka ah weli si sharci ah looguma oggola inaad gasho Midowga Yurub, maadaama aadan buuxin shuruudaha gelitaanka; sidaas darteed, Hay'aduhu waa inay sameeyaan hubinno loo yaqaan screening. Inta lagu jiro habraacan, dhammaan xuquuqda iyo waajibaadka uu dhigayo sharciga qaranka, kan caalamiga ah iyo kan Midowga Yurub way khuseeyaan.

2. **<u>Hawlaha screening-ka</u>**

Hawlaha screening-ku waxay ka dhici karaan halkan Lampedusa, waxayna sidoo kale sii socon karaan ka dib marka laguu wareejiyo meel kale oo la yiraahdo _______________________.
Kuwa soo socda waa tallaabooyinka ay dhigayaan xeerarka screening-ku:

- Hubin jireed oo lagu sameeyo qofka iyo alaabtiisa gaarka ah sababo amni awgood marka la gelayo xarunta.
- Hubinno hordhac ah oo ay sameeyaan shaqaalaha caafimaadku si loo xaqiijiyo haddii ay jiraan baahiyo degdeg ah oo daryeel caafimaad ama go'doomin ah sababo la xiriira caafimaadka dadweynaha.
- Xaqiijinta aqoonsiga, ururinta xogta shakhsiga ah (magaca, taariikhda iyo goobta dhalashada, jinsiyadda), iyo soo bandhigidda dukumentiyada aqoonsiga iyo safarka ee aad haysato, haddii ay jiraan. Haddii aadan dhiibin dukumentiyada, waxaa loo tixgelin karaa inaadan la shaqayn Hay'adaha.
- Sheegidda haddii ay jirto xaalad ah qof aan dal lahayn.
- Sheegidda joogitaanka xubnaha qoyska ee kula socda si aad u wada joogi kartaan.
- Sheegidda sababta aad u soo gashay Talyaaniga.
- Wadaagista xogta shakhsiga ah ee u dhexeysa Hay'adaha awoodda leh, iyada oo aan xogtan loo gudbin cid kale haddii aan oggolaanshahaaga la helin.
- Qaadista faraha iyo sawir aqoonsi.
- Hubinta xogta ku jirta nidaamyada dijitaalka ah ee qaranka iyo kuwa Yurub sababo amni awgood.
- Ururinta iyo kaydinta xogta, kaliya muddada loo baahan yahay, si loo maareeyo habraaca.
- Baaritaan caafimaad oo dheeraad ah si loo qiimeeyo baahiyaha caafimaad ee degdegga ah ama go'doominta caafimaad, iyo sidoo kale baahida daryeel caafimaad oo takhasus leh ama taageero nafsiyeed.
- Wareysi shaqsiyeed si loo sii baaro nuglaanta ama baahiyaha gaarka ah, iyo in si degdeg ah loo soo sheego xaaladaha nuglaanta gaarka ah.

Haddii aad ku jirto xaalad u baahan daryeel ama taageero gaar ah, aad bay muhiim u tahay inaad si degdeg ah ugu sheegto Hay'adaha; tusaale ahaan, haddii aad ka yar tahay 18 sano, aad u baahan tahay daryeel caafimaad, aad tahay haweeney, lesbian, gay, bisexual, transgender ama intersex, aad tahay qof naafo ah, aad u baahan tahay taageero nafsiyeed, aad tahay qof waayeel ah, aad tahay waalid keli ah oo leh carruur aan qaan-gaarin, aad qabto cudurro daran ama xanuunno maskaxeed (oo ay ku jirto xanuunka walbahaarka ka dhasha dhacdo naxdin leh), aad uur leedahay, aad ka badbaadday jirdil, kufsi ama noocyo kale oo daran oo rabshad nafsiyeed, jireed ama galmo ah; tusaale ahaan, haddii aad tahay dhibbane rabshad ku saleysan jinsiga, gudniinka fircooniga ah, guur carruureed ama qasab ah, ama rabshad loo geystay sababo galmo, jinsi, qowmiyadeed ama diimeed awgood, ama aad tahay dhibbane ka ganacsiga dadka (ujeeddo ahaan ka faa'iidaysi galmo, shaqo ama mid kale, ama xitaa lagugu qasbay guur).

Haddii aad ka yar tahay 18 sano, Talyaaniga waxaa laguu tixgelinayaa ilmo yar; taas macnaheedu waa inaad heli doonto soo-dhoweyn iyo taageero ku habboon baahiyahaaga iyo da'daada. Intaa waxaa dheer, haddii aysan kula socon waalidkaaga ama dad waaweyn oo sharci ahaan mas'uul kaa ah, waxaa ku matali doona qof weyn oo ku caawin doona si loo xaqiijiyo xuquuqdaada.
Haddii aad haysato dukumentiyo ama shahaadooyin caafimaad oo xaqiijin kara waxa aad sheegaysid, muuji sida ugu dhakhsaha badan.

- Ururinta macluumaad ku saabsan adiga, xubnaha qoyskaaga iyo safarkaaga laga bilaabo dalkaaga asalka ah ilaa dalka aad hadda joogto.
- Xiritaanka screening-ka iyadoo la saxiixayo foomka lana siinayo nuqul, ka dib marka la hubiyo, la xaqiijiyo ama la codsado in wax laga beddelo macluumaadka ku qoran foomka.
- Dhammaystirka screening-ka toddoba maalmood gudahood laga bilaabo marka laga soo dego dhulka Talyaaniga.

Dhammaan macluumaadka la bixiyo inta lagu jiro habraacan waa qarsoodi; marnaba looma gudbin doono dadka aan ku lug lahayn habraacan.

### 3. Xuquuqda iyo waajibaadka inta lagu jiro screening-ka

- Inta lagu jiro screening-ka, waxaad xaq u leedahay inaad hesho cunto, hoy, daryeel caafimaad oo jireed iyo maskaxeed, iyo in laguula dhaqmo si sharaf leh iyadoo la ixtiraamayo xuquuqahaaga aasaasiga ah.
- Haddii aad qabto wax dhibaato caafimaad ah, aad u baahan tahay taageero nafsiyeed ama nooc kale oo taageero ah, ama aad rabto inaad sheegto dhacdooyin kugu dhacay dalkaaga asalka ah, intii aad safarka ku jirtay ama markaad xadka ka gudubaysay, waxaad arrintan kala hadli kartaa Hay'adaha awoodda leh ama shaqaalaha ku caawinaya.
- Waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto qof kasta ama urur kasta oo bixiya talo iyo caawimaad, oo ay ku jirto caawimaad sharci.
- Haddii aad u aragto in xuquuqahaaga aasaasiga ah aan la ixtiraamin intii lagu jiray screening-ka, waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto Hay'adaha awoodda leh.
- Waxaa kugu waajib ah inaad diyaar u ahaato Hay'adaha screening-ka oo aad joogto meesha laguu qoondeeyay inta lagu jiro habraaca, iyo inaad bixiso macluumaad sax ah oo

dhammaystiran marka lagaa codsado, si Hay'aduhu u hubiyaan xaqa aad u leedahay inaad gasho oo aad joogto dhulka Talyaaniga.

- Waxaa kugu waajib ah inaad la shaqeyso Hay'adaha, gaar ahaanna waxaa kugu waajib ah inaad bixiso:
  - magaca, taariikhda dhalashada, jinsiga iyo jinsiyadda;
  - dukumentiyada aad haysato ee xaqiijin kara aqoonsigaaga;
  - farahaaga iyo sawirkaaga, kuwaas oo ay qaadi doonaan shaqaalaha loo xilsaaray.

  Haddii aadan la shaqayn Hay'adaha, waxaa dhici karta inay jiraan cawaaqib xun oo la xiriira habraacyada dambe ee lagu dabaqi doono.
- Waxaa lagaa rabaa inaad bixiso macluumaad dhammaystiran oo sax ah, adigoo caddeynaya macluumaadka aadan xasuusan ama aadan bixin karin.

**4. Xaqa lagu codsanayo ilaalinta caalamiga ah**

- Haddii aad ka baqeyso inaad ku noqoto dalka aad muwaadinka ka tahay ama, haddii aad tahay qof aan dal lahayn, dalka aad caadi ahaan deggenayd, sababtoo ah noloshaada ama xorriyaddaada ama tan xubnaha qoyskaaga ayaa khatar ku jirta, ama sababtoo ah waxaad ka baqeyso jirdil, si xun loola dhaqmo ama tacaddiyo culus, waxaad xaq u leedahay inaad codsato ilaalin. Haddii lagu silciyay ama aad ka baqeyso in lagu silciyo sabab la xiriirta isirkaaga, jinsiyaddaada, ka tirsanaanta koox qowmiyadeed, diintaada ama aragtidaada siyaasadeed, ama haddii aad ka tirsan tahay koox bulsho oo gaar ah oo aad ka baqeyso rabshad ama in addoonsi laguu geliyo, ama haddii aad ka baqeyso in dil lagugu xukumo, lagu jirdilo, ama aad ka timid aag dagaal, waxaad codsan kartaa ilaalin.
- Haddii aad rabto inaad codsato ilaalinta caalamiga ah, si cad u sheeg inta lagu jiro screening-ka, una sharax sababaha Hay'adaha awoodda leh.
- Haddii aad codsato ilaalinta caalamiga ah, waxaad xaq u yeelan doontaa in laguu wareejiyo xarun soo-dhoweyn oo ku habboon baahiyahaaga.
- Waa inaad codsigaaga ku gudbisaa Talyaaniga, maadaama ay tahay meesha aad timid oo aad hadda joogto. Ma dooran kartid dalka mas'uulka ka noqon doona kiiskaaga, laakiin baahiyaha la xiriira midnimada qoyska waa la tixgelin doonaa.
- Haddii aad xubno qoyskaaga ka mid ah ku leedahay Dawlad xubin ka ah Midowga Yurub, u sheeg Hay'adda awoodda u leh screening-ka; arrintani waxay waxtar u yeelan kartaa qiimeynta haddii aad xaq u leedahay in si sharci ah laguu mideeyo iyaga.
- Haddii aad codsato ilaalinta caalamiga ah, waa inaad ku sii nagaataa Talyaaniga mana u guuri kartid Dawlad kale oo xubin ka ah Midowga Yurub adigoon oggolaansho ka helin Hay'adaha. Haddii aad ka tagto Talyaaniga ka hor inta aan go'aan laga gaarin codsigaaga ilaalinta caalamiga ah, arrintani waxay saameyn ku yeelan doontaa habraacaaga, maadaama qofka codsanaya ilaalin uu marka hore sugo go'aanka ku saabsan Dawladda mas'uulka ka ah codsiga. Haddii aad u guurto dal kale ka hor go'aankaas, Hay'aduhu waxay ka noqon karaan soo-dhoweynta xarunta.
- Talyaaniga waxaa ka jira habraacyo kala duwan oo lagu qiimeeyo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah: habraaca caadiga ah, habraaca degdegga ah oo leh waqtiyo ka gaaban, iyo habraaca degdegga ah ee xadka, kaas oo aad u dhakhso badan laguna dabaqo meelaha Talyaanigu u aqoonsan yahay aagag xuduudeed ama transit.
- Habraacyada kala duwan iyo waqtiyadooda waxaa laguu sharxi doonaa marxalad dambe, maadaama habraaca uu dejiyo sharciga Talyaaniga ayna dabaqaan Hay'adaha Talyaaniga iyadoo lagu saleynayo xaaladdaada shakhsiga ah.

Haddii aad ka yar tahay 18 sano oo aad tahay ilmo aan la socon waalidkiis ama dad waaweyn oo sharci ahaan mas'uul ka ah, waxaad xaq u leedahay inaad gasho habraac gaar ah oo lagu bixiyo oggolaanshaha joogitaanka sababo la xiriira da'daada yar.

5. **Dib-u-celin**

Haddii aadan codsan ilaalinta caalamiga ah oo aadan buuxin shuruudaha gelitaanka, waxaa suuragal ah in lagugu celiyo dalkaaga asalka ah ama dal kale oo laguu oggol yahay inaad gasho oo aad joogto, iyadoo lagu saleynayo go'aan dib-u-celin ah.

6. **Dib-u-dejin**

Waxaa sidoo kale suuragal ah in laguu wareejiyo Dawlad kale oo xubin ka ah Midowga Yurub oo go'aansata inay qaadato mas'uuliyadda codsigaaga ilaalinta caalamiga ah; habraacan waxaa loo yaqaan dib-u-dejin (ama relocation).

7. **Habraaca lagu dabaqi doono**

Marka screening-ku dhammaado, waxaad heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta caalamiga ah, dib-u-celinta ama dib-u-dejinta, iyadoo ku xiran habraaca lagu dabaqi doono kiiskaaga.

8. **Ilaalinta xogta**

Xusuusnow in sharciga Midowga Yurub ee ilaalinta xogta uu ku siinayo xaqa aad u leedahay inaad hesho xogtaada shakhsiga ah, taas oo ah macluumaadka adiga kugu saabsan ee aad wadaagtay, inaad saxdo, iyo inaad codsato in laga tirtiro kaydadka xogta ee Talyaaniga iyo Yurub ee lagu diiwaangeliyay inta lagu jiray habraaca, iyadoo la raacayo shuruudaha qaarkood ee sharcigu dejiyo.

Xusuusnow inaad mar walba xaq u leedahay in lagugu wargeliyo habraacyada adiga ku khuseeya, inaad codsato faahfaahin, iyo inaad waqti kasta la hadli karto shaqaalaha aad la kulmi doonto inta aad ku jirto safarkaaga Talyaaniga.